

KAADHKA MACLUUMAADKA (EPIDURAL) CIRBADEYN TA LAF-DHABARKA

Epidural'ka markii la foolanaayo – maxaa uu baahan tahay inaad ogaato
(Kaadhkaan waa mid kooban. Macluumaad dheeraad ah waxaa laga heli karaa www.oaafomothers.info. Fadlan kala hadal takhtarkaaga suuxinta wax kasto oo aan caddeyn)

Diyaarinta cirbadeynta laf-dhabarka (epidural)

- Waxaad u baahan doontaa in tubo yar lagaa geliyo xididka gacanta iyo waxaa surto gal ah in biiyaha faleebada lagugu suro xididka.
- Inta laga gelinaayo tubada yar ee laf dhabarkaaga (epidural), waa muhiim inaadan dhaqaaqin iyo u sheeg takhtarka suuxinta haddii uu xanuunka foosha kugu bilaabdey.
- Waxay caadi ahaan ku qaadata 20 daqiiqo diyaarinta iyo 20 daqiiqo ka hor intii ay si buuxda u shaqeynin.
- Qaar ka mid ah epidural'ka si buuxda uma shaqeeyaan waxayna u baahdaan in la beddelo ama la hagaajiyo.

Faa'iidooyinka epidural'ka

- Wuxuu caadi ahaan yahay xanuun joojiye aad u fiican.
- Mar-mar waxaa laf-dhabarka (spinal) lagu cirbadeyn karaa daawada xanuun joojiyaha ah sidii waxtar deg-deg ah loo helo.
- Qiyaasta iyo nooca xanuun joojiyaha mar-mar waa la beddeli karaa sidii lagu siiyo awood inaad sarriirta ku dhaqaaqdo. Kani waxaa loo yaqaana epidural'ka qiyaasta yar leh (ama lagu dhaqaaqi karo).
- Cadi ahaan epidural'ka wax-yeelo uma geysanaayo cunuggaaga.
- Waa la xoojin karaa awoodiisa markii la sameynaayo qalliinka dhalidda haddii loo baahdo.

Dhibaatooyinka ka imaan karo epidural'kaaga

- Badinta qiyaasta xanuun joojiyaha oo xoog leh wuxuu keeni karaa in si ku meel gaar ah lugahaaga awood-darro yeeshaan kaasoo badin doonto halista in cunugga lagu soo saaro qalab.
- Epidural'ka wuxuu in yar tartiibin karaa marxaladda labaad ee dhalidda.
- Waxaa kugu dhici karo dhiig yar, cun-cun ama xummad markii aad isticmaalayso epidural'ka.
- Goobta laga sameeyay epidural'ka wuu ku xanuuni karaa laakin maalmo yar oo keliya. Dhabar xanuunka KAMA imaado epidural'ka laakin waa iska caadi uur ka dib.

Dhinaca kale ee kaadhkaan waxaa ku qoran khatarta muhiimka ah ee epidural'ka



KAADHKA MACLUUMAADKA (EPIDURAL) CIRBADEYNTA LAF-DHABARKA

Khatarta ka imaan karto epidural'ka ama cirbadeynta laf-dhabarka sidii loo yareeyo xanuunka foosha

Nooca khatarta	Imisa jeer ayuu dhaca?	Sidee ayuu caadi u yahay?
Dhiigga oo si badan hoos uu dhaco	Halkiiba 50 dumar walba	Mar-mar
Si fiican u shaqeynin sidii loo yareeyo xanuunka foosha taasoo keenayso inaad isticmaasho habab kale ee aad ku yarayso xanuunka	Halkiiba 8 dumar walba	Caadi
Si fiican waxtar ugu leheen qalidda ilmo dhalidda (caesarean), sidaas awgeed waxaad u baahan doontaa in lagu suuxiyo	Halkiiba 20 dumar walba	Mar-mar
Madax-xanuun oo xun	Halkiiba 100 dumar walba (epidural) Halkiiba 500 dumar walba (spinal)	Caadi ama ahan
Dhaawac gaaro dareen-wadeyaasha (meel aan wax laga dareemin lugta, ama lugta oo awoodeeda yaraado)	Ku meel gaar - Halkiiba 1000 dumar walba	Naadir (dhif ah)
Wax-yeelidda la dareemo in ka badan 6 bilood	Joogto ah - Halkiiba 13,000 dumar walba	Naadir
Jeermis ka dhasho aaga lagu sameeyay epidural'ka	Halkiiba 50,000 dumar walba	Aad naadir u ah
Meningitis (cudur maskaxda ku dhaco)	Halkiiba 100,000 dumar walba Halkiiba 170,000 dumar walba	Aad naadir u ah Aad naadir u ah
Epidural haematoma (xinjir dhiig)	Halkiiba 100,000 dumar walba	Aad naadir u ah
Shil ahaan loo suuxo	Halkiiba 250,000 dumar walba	Aad iyo aad naadir u ah

Macluumaadka laga helo dokumentiyada la soo daabacay ma bixiyo tirada saxda ah ee khataradaan. Tirada kor ku xusan waa qiyaasid wayna u kala duwanaan karaan isbitaalada kaladuwan.

Dhinaca kale ee kaadhkaan waxaa ku qoran macluumaad ku saabsan epidural'ka loo isticmaalo xanuunka foosha

